

Dayactirka Booseejada Franklin Avenue

metrotransit.org/franklin


Dayactirka Booseejada Franklin Avenue

Leenka Buluuga Metro ee Boosteejada Franklin Avenue, ee la furmay 2004, waxaa ku socda dayactir weyn si wax looga qabto kaabaha duugoobay, cilada sida joogtada ah ugu imaada wiishka, waxyaabaha ka dhamaaday, iyo walaacyada ka dhanka ah badqabka ee ay qabto bulshada. Qayb ka mid ah dadaalkan, waxaan la shaqeyneynaa bulshada si aan u hubinno in naqshada boosteejadu ay ka tarjumayso xaafadda iyo dadka ay u adeegto.

Naqshadeynta waxay bilaabatay Dayrtii 2025. Dhismaha waxaa loo qorsheeyay inuu bilaabmo gudaha Febraayo 2027, wuxuuna socon doona ilaa iyo Diseembar 2028.

Saacada

Dhismaha wuxuu bilaaban doonaa sannadka 2027, iyadoo shaqadu marka hore ka bilaaban doonto jidadka dadka maraan ee janjeerta iyo wiishashka kor u socdaan. Marka la gaaro 2028, shaqada madasha ayaa bilaaban doonto.



Mabaadi'da Hagta Naqshadda

Bilowgii geeddi-socodka naqshadaynta, talooyinka bulshada ayaa loo adeegsaday in lagu sameeyo mabaadi' naqshadayn oo hagaysay naqshadaynta, muuqaalka iyo dareenka guud ee boosteejada intii ka dambaysay geeddi-socodka naqshadaynta.



Jiilasha



Bulshada



Dabiiciga



Fursad




Dib u soo celin



Fikrad cabirid



Sinnaanta



Xiriirro

Soo Koobida Ka qaygalka Madaxda Sare

Mashruuca Naqshadaynta Dayactirka Boosteejada

Franklin ee Leenka Blue #62101

8/5/2026

Ka-qaybgalka bulshada wuxuu qayb muhiim ah ka ahaa naqshadaynta Boosteejada Franklin Avenue, si uu uga tarjumo mudnaanta iyo waxa ay doorbidayaan bulshada. Xilli hore ka qayqaadashada bulshada wuxuu gacan ka geystay qeexidda mabaadi'da hagta dinbanaqshadaynta boosteejada. Intii lagu guda jiray geeddi-socodka naqshadaynta, talooyinka bulshada ayaa qaabeeyey muuqaalka iyo dareenka guud ee boosteejada, iyo sidoo kale astaamaha gaarka ah ee goobta sida jaranjarooyinka dadka naafada ah gaadiidka ku fuulaan, dhirta iyo cagaarka, astaamaha badbaadada iyo amniga, iyo adeegyada kale.

Yay tahay cida aan ka helnay ra'yi celin?

Si loo ururiyo ra'yi-celinta ku saabsan naqshadaynta Boosteejada Franklin Avenue, kooxdu waxay isticmaashay aalado internetka ah sida ra'yi uruurino iyo wacyigelin fool-ka-fool ah, oo ay ka mid yihiin qaybinta waraaqaha xayeysiiska la geeyo guri kasta, shirarka dadweynaha, aqoon-is-weydaarsiyada lala yeesho ururrada iyo hoggaamiyayaasha bulshada, iyo miisas xog-bixin ah oo lagu diyaariyo munaasabadaha ku-meelgaarka ah. Iyadoo la tixgelinayo goobta boosteejada ay kaga taalo Franklin Avenue East Cultural District, mashruucu wuxuu mudnaanta siiyey ka-qaybgal ku dhisan xiriir iyo wada-shaqayn lala yeesho bulshada guud ahaan, iyo bulshooyinka dadka asaliga ah iyo Hindida maraykanka ah.

Tirakoob ahaan

45+

Ka qaybgalaal

Aqoon-is-weydaarsiyada CBO:

Kulanno si qorshaysan loo qabtay oo lala yeeshay ururrada bulshada ku salaysan iyo xubnaha bulshada dadka asaliga ah, si loo qiimeeyo fikradaha naqshadaynta iyo saamaynta ay ku yeelanayaan xaafadda.

40+

Ka qaybgalaal

Munaasabadaha ku-meelgaarka ah ee xaafadda iyo agagaarka boosteejada:

Munaasabado ay bulshadu hoggaaminayso, halkaas oo ka qaybgalayaashu ku wadaagaan waayo-aragnimadooda, kuna qiimeeyaan badbaadada boosteejada, fudaydka helitaanka iyo isticmaalka, iyo muujinta dhaqanka.

80+

Ka qaybgalaal



Kulamo U furan Dadweynaha:

Munaasabad onlayn ah ama fool-ka-fool ah oo ay ka qaybgalayaashu ku qiimeeyeen badqabka boosteejada, fudaydka helitaanka iyo isticmaalka, iyo muujinta dhaqanka.

135+

jawaabood

Ra'yi uruurinta war-celinta: Iyadoo loo marayo ra'yi uruurinta iyo munaasabadaha ka-qaybgalka fool-ka-foolka ah, ka qaybgalayaashu waxay shaqaalaha mashruuca la wadaageen faallooyinkooda ku saabsan naqshadda iyo astaamaha boosteejada.



(Bidix) Xubin ka tirsan bulshada ayaa ra'yi-celin ka bixinaya naqshadda boosteejada ee la soo jeediyay intii lagu jiray munaasabadda National Night Out. (Bartamaha) Shaqaalaha mashruucu waxay xubnaha bulshada la wadaagayaan macluumaad munaasabad ku-meelgaar ah oo lagu qabtay agagaarka boosteejada. (Midig) Ra'yi-celinta bulshada ee ku saabsan farshaxanka dadweynaha oo la ururiyey intii lagu jiray kulan bulsho.

Wajiga 2 ee Soo Koobida Ka qaygalka Madaxda

Mashruuca Naqshadaynta Dayactirka Boosteejada

Franklin ee Leenka Blue #62101

5/08/2026



Natiijooyinka muhiimka ah

Naqshadeynta boosteejada la soo jeediyay waxay xubnaha bulshada tusisay sida uu u ekaan karo goobta, saqafka iyo meelaha laga soo galo boosteejada.

Xubnaha bulshadu **guud ahaan way taageersanaayeen naqshadda**. Qaar badan ayaa xoogga saarayay rabitaanka ah in boosteejado noqoto **ammaan, mid soo dhaweyn leh, iyo inay u dabaaldego taariikhda iyo dhaqanka xaafadda iyada** oo lagu samaynayo astaamo sida farshaxanka dadweynaha.

Fikradaha iyo aragtida dadweynuhu waxay gacan ka geysteen qaabaynta horumarinta, naqshadaynta iyo goobaha lagu sameynayo waxyaabahan soo socda:

- Ammaanka gudaha iyo hareeraha boosteejada iyo ku xirida kamaradaha ammaanka
- Sawirro farshaxan ah iyo farshaxanka dadweynaha oo lagu dhajiyo buundada hoosteeda
- Nalal lagu dhajiyo buundada hoosteeda
- Goobo hadh leh si loo yareeyo saameynta kulaylka ee meelaha magaalooyinka
- Kuraas si loo dhiirrigeliyo is-dhexgalka dadka isticmaala gaadiidka dadweynaha iyo in loo fududeeyo dadka qaba baahiyaha gaarka ah
- Xayndaab u eg caws dhaadheer ama cawska sweetgrass, si naqshaddu si muuqata u tusto aqoonsiga dadka asaliga ah



Naqshadda la soo jeediyay ee boosteejada – muuqaalka dhulka oo dhanka bari laga eegayo Boosteejada Franklin.

Ka-qaybgalka sii socda

Naqshadda la soo jeediyay ee boosteejada waxay ka koobnayd meelo loogu talagalay farshaxanka dadweynaha oo ku baahsan boosteejada oo dhan. Inta lagu jiro wejiga ugu dambeeya ee naqshadaynta, waxaa la sameynayaa ka-qaybgal qoto dheer oo lala yeesho bulshada si looga wada hadlo muuqaalka guud, mawduucyada, agabka iyo farriimaha farshaxanka. Kooxda mashruuca waxay ra'yi-celinta bulshada ku ururin doontaa miisas xog-ururin ah oo lagu qaban doono meel u dhow boosteejada iyo munaasabadaha bulshada, iyo sidoo kale ra'yi uruurinta onlaynka.

Iskaan garee QR koodhka ama booqo:

<https://arcg.is/1vCK5e5>



Xog ogaal ahood Ma xiisaynaysaa mashruuca? Waxaan jeclaan lahayn inaan dhagaysano fikradahaaga.



Franklin@metrotransit.org



metrotransit.org/franklin



[MetroTransitMN](https://www.facebook.com/MetroTransitMN)



612-373-3333

Call for translation

Llamar para la traducción

Gọi điện để nhận bản dịch

Wac Turjimid

Hu rau tus txhais lus

